# Crime Victims Bill of Rights RCW 7.69.030

King County Prosecutor's Office waxa uu samayn doonaa dadaal macquul ah oo uu ku xaqiijinayo in dhibanayaasha iyo markhaatiyayaasha la siiyo xuquuqaha soo socda:

1) Waa inay jirto dadaal macquul ah oo loo sameeyo si loo xaqiijiyo in dhibanayaasha, dadka masiibo ka badbaaday, iyo makhaatiyayaasha dambiyada ay helaan xuquuqaha soo socda, taas oo khusaysa dacwada danbi ee dadka waawayn ama caruurta iyo wixii kale ee dacwad ah ee hoos yimaada cutubka 10.77 ama 71.09 RCW:

   a) Ka jawaabida tacadiga ama dambiyada galmada ee dhibanayaasha, helitaanka, wakhtiga gaadhsiinta saraakiisha bilayska, bayaanka qoraalka ah ee xuquuqda dhibanaha danbiga sida lagu sheegey cutubkan. Bayaanka qoraalka ah waa inuu kamid yahay magaca, cinwaanka, iyo lambarka taleefanka ee degmada ama barnaamijyada dhibanaha/markhaatiga deegaanka, hadii barnaamij dhibanaha/markhaatiga ee danbi uu ka jiro degmada;

   b) In ay u sheegaan hay'adaha amaanka ama dacwad oogaha xeer ilaalintu xukunka kiiska ee dhibanaha, cida masiibada ka badbaaday, ama markhaatigu ku lug leeyahay;

   c) Marka la eego dhibanayaasha ku xad gudbay danbiyada, tacadiga guriga dhaxdiisa, ama danbiilaha galmo, inay u sheegaan hay'adaha amaanka ama xeer ilaalinta dacwad oogaha in dacwad laga soo oogay iyo marka la ogaado in eedeysanuhu aanu maxkamad soo istaagi karin iyo u wareejinta adeegyada soo celinta;

   d) La gaadhsiinayo dhinaca soo saaray yeedhmada in dacwad maxkamad oo yeedhmada loo soo saaray ayna ku dhacaynin wakhtigii la qorsheeyay, si loo ruuxa looga baajiyo safarka aan loo baahnayn ee maxkamada uu ku imanayo;

   e) In la helo badbaadada waxyeelo iyo khatar ee ka iman karta la shaqaynta bilayska iyo dadaalka dacwad oogista, iyo in lagu siiyo malcuumaadka heerka badbaado ee aad heli karto;

   f) In laguu sheego nidaamyada la raacayo marka la xaraynayo ee la heli karo kharashaadka markhaatiga ee ay xaqa u leeyihiin;

   g) In lagu siiyo, marka ay macquul tahay, goob amaan ah oo lagu sugo wakhtiga maxkamadu socoto oo aan u baahnayn inay noqoto meel ka xidhan eedeysanaha iyo qoysaska ama asxaabta eedeysanayaasha;

   h) In wixii lagaa xaday ee hanti ah ama alaab shakhsi ahaaneed ah in laguu dedejiyo inay kuu soo celiyaan bilaysku ama maxkamada sare marka ayna wixii intaa ka danbeeya ugu baahnayn cadayn. Marka ay macquulka tahay, dhamaan hantiyaha noocaas ah, marka laga tago hubka, lacagta, wixii kontorobaan ah, hantida ay ka waajibto qiimaynta ka qaadid, iyo hantida mulkiyadeeda la isku hayso, waa in la sawiro oo loo celiyo mulkiilaha toban maalmood gudahood marka lagaa qaado;

   i) In lagu siiyo adeegyada lagaaga ilaalinayo cida aad u shaqayso ee munaasabka ah si loo xaqiijiyo in cida ay u shaqeyeaan dhibanayaasha, dadka ka badbaaday masiibada ee dhibanayaasha ah, iyo markhaatiyaasha danbi inay la shaqeeyaan nidaamka cadaalada danbiyada ama dacwada madani sida uu dhigayo cutubka 10.77 ama 71.09 RCW si loo yareeyo xaalada ay shaqaaluhu ku waayi karaan lacagta iyo wixii kale ee gunooyin ah ee ka iman kara imaatinka maxkamada;

   j) Si loo heli karo kaalmo caafimaad oo degdega ah oo ayna kuugu diidin mudo dheer oo aan macquul ahayn bilaysku kahor inta ayna ku siinin wixii kaalmo maamul ah. Laakiin, shaqaalaha hay'ada amaanku waxay, hadii ay daruuri noqoto, u raaci karaan ruuxa

xarunta caafimaadka si looga waraysto qoka wixii ku saabsan dhacdo danbi hadii waraysigu aanu waxyeelo u gaysanaynin kaalmada caafimaadka. Dhibanayaasha tacadiga guriga, tacadiga galmada, ama daba gurista, sida lagu sheegey RCW 49.76.020, waa in loo sheegaa xuquuqdooda fasaxa macquulka ah ee shaqada sida uu dhigayo 49.76 RCW;

k) Marka la eego dhibanayaasha tacadiga iyo danbiyada galmada, inay ka helaan u ololeeya dhibanaha danbigu barnaamijka dhibanaha/markhataagiga dambiga, ama wixii kale ee taageero dad ee dhibuhu doono, inay joogaan wakhtiga dacwad oogista ama waraysiyada eedeysanaha oo ay la socdaan dhibanaha, iyo wakhti kasta oo maxkamada la xidhiidh ah sharciyada danbiga ee laga geley dhibanaha. Qaybtan waxaa la dabaqaa hadii ay macquul tahay iyo hadii ay jiraan u ololeeye dhibanaha danbiga ama ruux taageero oo aanu keenaynin dib u dhac aan loo baahnayn oo baadhigaanka ama dacwad oogida kiiska ah. Kaalinta u ololeeyaha dhibanaha danbigu waxaa weeye in uu siiyo taagero dareen oo dheeraad ah oo dhibanaha danbiga;

l) Iyada oo aan la eegeynin hadii uu ruuxu dhibane u yahay dagaal, tacadiga guriga dhaxdiisa, ama tacadiga galmada, dhibanahaasi waxay uu iman karaa dacwada maxkamada ama waraysiyada foolka-foolka ah ama onleynka ah ee waajibka ah, waxaa kamid ah fiidyaw ama qaab kale oo elektoroonig ah, sida ay ka helitaanka maamulka deegaanka, si loo xaqiijiyo helitaanka cadaalada ee qayb galaha ee dacwada cadaalada dambiga;

m) Iyada oo aan la eegeynin dhibanaha iyo ruuxa ka badbaaday masiibada, inu joogo wakhtiga dacwada maxkamadu socoto maxkamada, ama hadii loogu yeedhay in wax la waydiiyo, in loo qabto balanta maxkamada wakhtiga ugu horeysa ee macquulka ah si uu u yimaado isaga oo socda wakhtiga maxkamadu socoto kadib marka wax la waydiiyo iyo in aan kaliya lagaga reebin maadaama oo uu wax sheegey;

n) Dhibanayaasha iyo dadka ka badbaaday masiibada ee kiiska danbi, wixii kiis ah ee tacadiga guriga dhaxdiisa ah, ama wixii go'aanka ugu danbeeya ah ee hoos yimaada cutubka 10.77 or 71.09 RCW, in uu sheego looyarku dacwad oogaha ahi taariikhda, saacada, iyo goobta dacwada maxkamadaa iyo dhagaysiga xukunka ama dhagaysiga ka doodida marka uu dalbado dhibanuhu ama ruuxa ka badbaaday masiibadu;

o) In loo gudbiyo bayaanka saamaynta dhibanaha ama warbixinta maxkamada, iyada oo uu gacan ka siinayo xeer ilaaliyaha dacwad oogaha ahi hadii loo baahdo, taas oo ay tahay in lagu daro dhamaan warbixinaha jira iyo rasmiga ah oo waxaa kamid ah faylasha iyo duwaanada ay la socdaan danbiilaha lagu wareejiyay gacan hay'ada ama xarunta gobolka;

p) Dhibanayaasha iyo dadka ka badbaaday masiibada wixii kiis danbi ah ama wixii kiis ah ee tacadiga guriga dhaxdiisa ah, si bayaan looga akhriyo, si shakhsi ahaaneed ama iyada oo wakiil la isticmaalayo, dhagaysiga xukunka; iyo

q) Dhibanayaasha iyo dadka ka badbaaday masiibada, si ay u helaan amarka magdhawga maxkamada ee dhamaan kiisaska danbiyada, xataa marka danbiilaha lagu xukumo xadhig, iyada oo xaalad gaar ahi ay jirto moojee taas oo ka dhigaysa in magdhawgu aanu macquul noqon marka ay maxkamadu eegto.

2) Hadii dhibanaha, ruuxa ka badbaaday masiibada, ama markhaatiga danbi loo siido xuquuqda hoos timaada qaybtan, ruuxu waxa u dalban karaa amar isaga oo toos ugu cabanaya cida ay khysayso ama dhinacyada isaga oo ka xaraynaya dacwada maxkamdaa sare ee degmada ee danigu ka dhacay oo wargelin siinaya dacwada dhinaca ama dhinacyada ay khusayso. Cabashada xauquuqdu waxay kaliya u jirtaa dheeraad ahaan. Maxkamadu waa inay dedejisaa eegitaanka dacwada lagu xareeyay qayb hoosaadkan.